

daadgureyn

Xaqiiqada: Maamulaashu waxey soo saareen amar ku saabsan in dadka laga daadgureeyo meelo ka mid ah Seattle. Taasi macnaheedu waaxey tahay in lagu warsado in aad aado meel loogu tala galay daka oo ka fog meesha dhibka ka dhacay.

Maxaa la sameeyaa:

- Markii lagu warsado in aad meesha ka baxdo, yeel sida ugu dhaqsaha badan. Raac jidadka lagu talinayo ee calaamadaha ogeysiisku bixinayaan. Qaar ka mid ah jidadka waxay yeelan karaan calaamado muuqda oo ku yaala waddooyinka iyo jidadka waaweyn.
- Ha yeelin in aad ka dusto meel dhow, waxaa laga yabaa in ay xirantahay.
- Qaado oo keli ah waxyaabaha muhiimka ah - daawo, cuntooyinka gaarka ah, waxyaabaha gaarka ah, Qalabka ilmaha, dhar, lacag, iyo waraaqaha qiimaha leh.
- Hubso gurigaaga ka hor intaadan ka bixin. Xidh daaqadaha iyo albaabada.
- Haddii ay suurtoagal tahay, diyaarso qof ka baxsan goobta aad ka baxeyso si uu u daryeelo ama u ogaado xayawaankaaga. Xayawaanka looma ogola hoyga sheltarada qaarkood, waana in aan loo oggolaan in ay si dabacsan u baxsadaan.
- Haddii aadan heysan gaadiid, caawimaad weydiiso deris kaaga ama saaxiib. Haddii la cayimay meesha la iska qaadayo, hubi in masaafad loo lugeyn karo.
- Ha kuu shidnaado raadiyaha si laguula socodsiiyo warbixinada degdeg ah.
- ***Haddii aad garaneyso qof aan awoodin in uu fahmo, arko, ama aan maqlin farriintan, fadlan u sheeg waxa ay ku saabsan tahay.***

Xiriir kale ee ku Caawinaya:

<http://www.ready.gov/evacuating-yourself-and-your-family>